

UTI (Somali)

# Infekshanka kaadi mareenka



Infekshanka kaadi mareenka (urinary tract infection - UTI) waa infekshan bakteeriya ah kaas oo ku dhaca kaadi mareenka (tubo ka caawisa inay kaadida ka soo baxdo jirka), kaadiheysta ama kelyaha. UTIs waxay ku badan yihii carruurta da'doodu ka yar tahay 12 bilood, gaar ahaan gabdhaha. Wuxuu sababa bakteeriya jidhka gasha oo kor usii aada kaadi mareenka.

## Calaamadaha iyo xanuunka



Marka la kaadinayo in la dareemo xanuun ama gubasho



Aadida musquusha in ka badan sidii caadiga ahayd



Kaadi ur badan



Xanuun caloosha ama dhabarka ah

Dhallaanka qaba UTI waxaa laga yaabaa inay yeeshaan qandho, matag, degenaan la'an, quud yari ama waxaa dhici karta in maqaar kooda uu ka fududaado sida caadiga ah.

## Daawaynta

UTIs waxaa lagu daaweyyaan antibiyootik oo inta badan lagu qaadan karo guriga.

Daawaynta xilli hore ah ayaa ugu fiican. Haddii dhakhtarku ka shakiyo in ilmahaagu qabo UTI waxay ku bilaabi doonaan antibiyootiga marka kaadi laga qaado si loo baaro. Antibiyootiga waa la bedeli karaa markii shaybaarka uu soo celiyo natijada baaritaanka.

Haddii ilmahaagu uu ka yar yahay 3 bilood ama aad u xanuunsanayo, waxa laga yaabaa in la seexiyo cusbitaalka si qaab faleenbo ah loogu siiyo antibiyootig (xididka).

Antibiyootigada waxaa badanaa loo baahan yahay 3 ilaa 5 maalmood. Waxay qaadan kartaa 1 ilaa 2 maalmood in astaamuhu soo roonaadaan.

Paracetamol (Panadol) ama ibuprofen (Nurofen) ayaa kaa caawin kara calaamadaha xanuunka. Raac tilmaamaha ku yaal baakadda ama dhalada si aad u hesho qiyaasta saxda ah ee ilmahaaga loogu talagalay.

Ural Sachets (oo laga heli karo farmashiyaha) ayaa laga yaabaa inay ka caawiyaan dhallinta xanuun kasta.

## Goorta loo baahan yahay in la arko dhakhtar



**U tag GP-gaaga haddii u ilmahaagu leeyahay:**

- Calaamadaha UTI
- haddii laga helay UTI oo:
  - uusan soo roonaanaan 2 maalmood ka dib markuu qaato antibiyootiga
  - haddii ay ku noqoto inuu qaato antibiyootiga
  - haddii uu matagayo
  - haddii uusan qaadaneyn cabitaan ku filan
  - haddii ay dareemayaan xanuun dhabarka ah.

Takhtarkaaga ayaa caadiyan baari doona kaadida ilmahaaga si uu u xaqijiyo haddii uu jiro infekshan. Kaadida ayaa sidoo kale loo diri doonaa shaybaadhka si loo xaqijiyo wixii markas jira iyo si loo ogaado antibiyootiga ugu fiican ee lagu daweeyn karo infekshanka.

Baaritaano dheeraad ah ayaa loo baahan karaa haddii ilmahaagu aad u xanuunsanayo, ama uu aad u yar yahay ama uu leeyahay UTIs badan. Takhtarkaaga ayaa taas kaala hadli doona, haddii loo baahdo.

## Ka hortagga UTIs

Si aad uga hortagto infakshan kale, waxaad u baahan tahay:

- hubi in ilmahaagu aysan calooshu taagneyn
- hubi in ilmahaagu cabbo cabitaan ku filan si ay kaadidoodu u noqoto mid cad oo midabkeedu khafiif yahay
- Gabdhaha bar in ay is nadaafinta xubnaha hoose ee jirka kasoo bilaabaan horay ayna ku dhameeyaan gadaal marka ay musqusha gelayaan oo ay gashtaan kastuumo ka sameysan maro laga neefsan karo (oo aanan aheyn synthetic).

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmadka Degdeegga ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Wuxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha.

**Resource ID:** FS348   **Reviewed:** July 2022

**Cudur-daar:** Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyadoo ujeedaduna tahay in loo isticmaalo tilmaame kaliya waxaana loogu talagalay in lagu taageero, balse aysan beddelin, wadahadalka dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiyyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacaysa nuqulkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.